



Warbixinta Waxqabadka Hay'adda Waddooyinka Puntland

Rubaca 3aad (July – Sep) 2025

*10th Jan 2026
Office of the CEO
Puntland Highway Authority*

Contents

1. Hordhac	3
.....	4
2. Waxqabadka maamulka iyo maaliyadda	4
2.1 Shirka daahfurka qorshaha istiraatiijiyadda shanta sano (2025-2029)	4
2.2 Shirka Isbuuclaha ee Staff-ka Hay'adda Waddooyinka Puntland	4
2.3 Tabobarka Data-Analysis (Excel)	4
3. Waxqabadka awoodsiinta hay'adda ee dhinaca farsamada dhismaha sahanka iyo shaybaarka ..	5
3.1 xarig Jarka qalabka ilaalinta Tayada daamuurka waddooyinka iyo sahanka dhismaha.....	5
3.2 tabobarka Injinneerada Hay'adda ee mashruuca dib u dhiska jidka Gaalkacyo - Bacaadweyn .	5
3. Waxqabadka dhismaha,dayactirka iyo yareynta shilalka waddooyinka Puntland	6
4.1 dhagax dhigga waddada Bacaadweyn – Gaalkacyo	6
4.2 Rakibaadda Qalabka Miisaanka Xamuulka ee Kontrolka Boosaaso.....	6
4.3 Rakibaadda Soolarka ee xarunta ilaalinta xamuulka DPL.....	6
4.4 sahanka iyo kala astaynta waddada Gaalkacyo-Bacaadweyn	7
4.5 dhismaha iyo taagista tabeelayaasha calaamadaha waddooyinka ee laamiga weyn	7
4.6 dayactirka iyo buuxinta burburka garbaha laamiga (embankment) ee deegaanka Carta.	7
4.7 Dayactirka iyo dhamaystirka Laamiga Garoowe–Qardho	7
4.8 dayactirka togga Ceeldaahir.....	8
4.9 Mashruuca dhismaha waddada Birtadheer–Kalabayr	8
4.10 dhismaha laanta Dusmada-Gaalkacyo	8
4.11 dhismaha iyo taagista tabeelayaasha calaamadaha waddooyinka	8
4.12 diyaarinta waddada kumeelgaarka ah ee Bacaadweyn	9
5. Waxqabadka maamulka, kormeerka iyo dabogalka mashaariicda horumarinta waddooyinka ...	10
5.1 kormeerka dhismaha waddada Birta-Dheer - Kalabayr	10
5.2 kormeerka PHA dhismaha waddada Gaalkacyo - Bacaadweyn.....	10
.....	10
5.3 kormeerka Dayactirka meelaha burburku soo galay Laamiga Garoowe–Xaaji Khayr.....	10
5.4 Kormeerka waddada Gaalkacyo – Bacaadweyn.....	11
.....	11
.....	11
5.5 Kormeerka PHA ee Deegaanka Faluuja.....	11
5.6 Kormeerka Injinneerada Hay'adda ee dhismaha waddada Gaalkacyo - bacaadweyn.....	11

6.	12
6.1 Xiriirka Hay'adda ee Dowladda Puntland.....	12
6.1.1 Fadhiga Ansixinta Yoolasha iyo Waxqabadka Tiirka Horumarinta Dhaqaalaha ee PDP ⁴ 2026–2030.....	12
6.1.2 Munaasabadda xarig Jarka Dowladda ee xarunta xakamaynta xamuulka gaadiidka ee Boosaaso.....	12
6.1.3 Kormeerka madaxda labada gole ee Dowladda ee waddada Gaalkacyo - Bacaadweyn.....	13
6.1.4 Xarig Jarka dhismaha Dalcadda Kalaale	13
6.1.5 Kormeerka laamaha Dowladda ee laamiga Birta-dheer - Kalabayr	13
6.1.6 Kormeerka Laamaha Dowladda ee dhismaha waddada Gaalkacyo-Bacaadweyn	13
6.2 Xiriirka Hay'adda PHA iyo Hay'adaha Caalamiga ah	14
5.3 Xiriirka Hay'adda ee Dadweynaha.....	14

1. Hordhac

Warbixinta waxqabadka hay'adda ee saddexda bilood ee July, August, iyo September 2025 waxa ay soo bandhigaysaa dulmar kooban oo ku saabsan guulihii iyo horumarkii ay hay'addu ka gaartay howlihii qorsheysnaa iyo kuwii aan qorshaysnayn balse lagu guuleystay in la qabto.

Warbixintan waxa ay ku salaysantahay qorshayaasha waxqabadka hay'adda ee sannadka 2025, iyadoo si gaar ah diiradda loo saarayo: horumarinta awoodda maamulka, dayactirka iyo hagaajinta jidadka, yareynta shilalka, kormeerka mashaariicda dhismaha waddooyinka, iyo xoojinta iskaashiga hay'addu la leedahay Dowladda, hay'adaha caalamiga ah, iyo bulshada rayidka ah.

UJEEDDOOYINKA HAY'ADDA SANNADKA 2025

1. Horumarinta Awoodda Maamulka iyo Maaliyadda Hay'adda.
2. Horumarinta Awoodda Hay'adda ee Farsamada dhismaha iyo sahanka waddooyinka.
3. Dib u dhiska, dayactirka iyo horumarinta jidadka laamiga weyn.
4. Maamulka, kormeerka iyo dabagalka Mashaariicda dayactirka ee horumarinta Jidadka.
5. In la xoojiyo Xiriirka Hay'adda PHA ay la lahayd Hay'adda Caalamiga iyo deeq bixiyaasha , Dowladda iyo dadweynaha, lana dhiso sumcadda Hay'adda.

2. Waxqabadka maamulka iyo maaliyadda

2.1 Shirka daahfurka qorshaha istiraatiijiyadda shanta sano (2025-2029)

24kii July la daahfuray Qorshaha Istiraatiijiyadda shanta sano (2025-2029), iyo Dib-u-eegista Qorshihii hore oo ka koobnaa saddex sano (2022-2024).

daahfurka waxaa kasoo qaybgalay Wasiir ku-xigeenka Wasaaradda Howlaha Guud, Agaasimaha Guud ee Madaxtooyada, Guddoomiyaha hay'adda Wadooyinka Puntland, Guddoomiye ku-xigeenka, agaasimayaasha waaxyaha PHA, marti sharaf ka socotay bah-wadaagta hay'adda iyo marti sharaf kale.



2.2 Shirka Isbuuclaha ee Staff-ka Hay'adda Waddooyinka Puntland

17kii September waxaa Hallka Hay'adda ka qabsoomay shirka isbuuclaha ah ee hawlwadeenada Hay'adda Waddooyinka Puntland, shirkan oo ay y soo qabanqaabisay Waaxda Shaqada iyo Shaqaalaha ayaa waxaa ka soo qaybgalay dhammaan waaxyaha Hay'adda, waxaana furay Guddoomiye Ku-xigeenka Hay'adda, Mudane Abdirizak Mohamed Hayir.



2.3 Tabobarka Data-Analysis (Excel)

25kii September waxaa xarunta Hay'adda Waddooyinka Puntland lagu soo gebagebeeyey tabobar socday laba maalmood, kaas oo lagu baranayey xirfadaha Data Analysis iyadoo la adeegsanayo Excel. Tababarkan waxaa soo qabanqaabiyey Waaxda Shaqada & Shaqaalaha oo uu hoggaaminayo Liibaan Abdillaahi Jama waxaana Casharrada bixinayay Eng. Abdimahad Mohamed Farah, Agaasimaha Waaxda Engineering-ka. Waxaana ugu dambayn soo xiray Guddoomiye Ku-xigeenka Hay'adda, Mudane Abdirizak Mohamed Hayir.



3. Waxqabadka awoodsiinta hay'adda ee dhinaca farsamada dhismaha sahanka iyo shaybaarka

3.1 xarig Jarka qalabka ilaalinta Tayada daamuurka waddooyinka iyo sahanka dhismaha

23kii July, Hay'adda Waddooyinka Dowladda Puntland (PHA) ayaa si rasmi ah xarigga uga jartay qalab cusub oo casri ah oo loogu talagalay ilaalinta tayada daamurka waddooyinka iyo sahanka dhismaha (drone survey iyo qalabyo kombiyuutar ah).



3.2 tabobarka Injinneerada Hay'adda ee mashruuca dib u dhiska jidka Gaalkacyo - Bacaadweyn

16kii Aghust, waxaa xarunta Hay'adda Waddooyinka Puntland ka furmay tobabar loo qabtay kooxda injinneerada ah ee ka shaqayn doona mashruuca dib u dhiska jidka Gaalkacyo-Bacaadweyn.



3. Waxqabadka dhismaha, dayactirka iyo yareynta shilalka waddooyinka Puntland

4.1 dhagax dhigga waddada Bacaadweyn – Gaalkacyo

Madaxweynaha Dowladda Puntland H.E Said Abdullahi Deni oo 3dii July safar shaqo ku tegay Deegaanka Bacaadweyn, ayaa dhagax dhigay dhismaha waddada isku xirta Bacaadweyn iyo Gaalkacyo, taasi oo lagu dhisayo isku tashi iyo cashuurta shacabka laga qaado oo dalka dib loogu dhisayo.



4.2 Rakibaadda Qalabka Miisaanka Xamuulka ee Kontrolka Boosaaso

9 kii July, Hay'adda Wadooyinka Puntland (PHA) waxa ay soo gabagabeysay dhismaha xarunta iyo rakibaadda qalabka miisaanka xamuulka ee gaadiidka, waxaana lagu rakibay Kontoroolka magaalada Bosaso waxaa goob joog u ahaa Eng Maxamuud Faarax.

Qalabkan ayaa muhiimad weyn u leh kordhinta bedqabka iyo cimriga waddooyinka, Hubinta in gaadiidka xamuulka wata u hoggaansamaan miisaanka la oggol yahay iyo yareynta burburka degdegga ah ee wadooyinka.



4.3 Rakibaadda Soolarka ee xarunta ilaalinta xamuulka DPL

16kii September, Hay'adda Wadooyinka Puntland waxay Xarunta Ilaalinta Xamuulka Culus ku rakibtay Qalabka Korontada Dhaliya ee Solarka, kaas oo muhiim u ah in miisaanka iyo howlaha kale ee xaruntu ay si joogto ah u shaqeeyaan.



4.4 sahanka iyo kala astaynta waddada Gaalkacyo-Bacaadweyn

13kii July, Hay'adda Wadooyinka Puntland (PHA), oo kaashanaysa shirkadaha dhismaha waddooyinkan ee Albshid iyo Kebarko, ayaa soo gabagabeeyey sahanka (final survey) iyo kala asteynta waddada Gaalkacyo - Bacaadwayn, oo dhererkeedu yahay 40km. Labada shirkadood ayaa loo calaamadeeyay in 20km ay midkiiba dhisto.



4.5 dhismaha iyo taagista tabeelayaasha calaamadaha waddooyinka ee laamiga weyn

27kii July Hay'adda Waddooyinka Dawladda Puntland (PHA) ayaa si rasmi ah u bilowday shaqada dhismaha iyo taagista tabeelayaasha calaamadaha waddooyinka ee jidka weyn ee isku xira gobollada Puntland. Tabeelayaashan muhiimka ah waxay door weyn ka ciyaarayaan bedbaadada dadka iyo gaadiidka.



4.6 dayactirka iyo buuxinta burburka garbaha laamiga (embankment) ee deegaanka Carta.

8dii Aghust, Hay'adda Waddooyinka Puntland (PHA) ayaa soo gabagabeysay shaqadii 4-aad ee dayactirka iyo buuxinta burburka garbaha laamiga (embankment) ee deegaanka Carta. Burburka waddada ayaa aha adherer ahaan 210m, qoto-dhererkiisuna 0.8m (80cm). Waxaa la leexiyay biyaha si looga hortago in biyuhu sii wiiqaan garbaha laamiga, iyadoo loo sameeyay marin biyuhu si toos ah baxaan.



4.7 Dayactirka iyo dhamaystirka Laamiga Garoowe-Qardho

08dii Aghust, Hay'adda Waddooyinka Puntland ayaa si rasmi ah u bilowday wajiga labaad ee dhamaystirka dayactirka lagu sameynayo meelaha burburku ka soo galay waddada u dhaxaysa Qardho iyo Dangorayo iyada oo asbuucii hore si guul ah kusoo dhammeysay shaqadii wejiga koowaad ee dayactirka waddada inta u dhaxatsa Garoowe iyo Dangorayo.



4.8 dayactirka togga Ceeldaahir

16kii Aghust, Hay'adda Waddooyinka Puntland ayaa soo gabagabeysay carro-qaadista gudaha Togga iyo buuxinta dhinaca Buundo jiifka ee biyuhu qodeen Togga Ceeldaahir. Shaqadan ayaa lagu dhameeyay heer guul ah oo dhan 100%.

Shaqada ayaa ka koobnayd:

- Dhererka Buundo Jiifka laga shaqeeyay: 80 mitir
- Qotada hoose (Depth): 0.7 mitir (70 cm)



4.9 Mashruuca dhismaha waddada Birtadheer-Kalabayr

Mashruuca dhismaha waddada Birtadheer-Kalabayr oo dhererkiisu yahay 20km ayaa maraya heer gabagabo ah iyada oo laami la saaray: 18.55km Waxaana dhiman: 1.45km

Waddadan ayaa wax weyn ka tari doonta isku socodka bulshada, horumarinta ganacsiga iyo fududeynta gaadiidka u kala goosha deegaanka.



4.10 dhismaha laanta Dismada-Gaalkacyo

3dii September, Shirkadaha gacanta ku haya dhismaha waddada Gaalkacyo – Bacaadweyn ayaa laanta Dismada – Gaalkacyo ka bilaabay nadiifinta iyo goynta jidka weyn, iyadoo laga shaqeeyay 8.5km wadada leexadka ah.

Mashruucan waxaa fulinaya Shirkadda Albaashid, waxaana lagu maalgeliyey cashuurta shacabka Puntland, halka Hay'adda Waddooyinka Puntland (PHA) ay kormeer ku hayso shaqada.



4.11 dhismaha iyo taagista tabeelayaasha calaamadaha waddooyinka

03dii September, Hay'adda Waddooyinka Dowladda Puntland (PHA) ayaa sii wada dadaallada ku saabsan taagista iyo dhismaha tabeelayaasha calaamadaha waddooyinka, iyadoo si rasmi ah looga soo gabagabeeyay wajigii labaad ee dhismaha iyo taagista tabeelayaasha, kuwaas oo laga taagay jidka laamiga ah ee isku xira Qardho iyo Garowe.



4.12 diyaarinta waddada kumeelgaarka ah ee Bacaadweyn

Waxaa la diyaariyay 18.5km oo waddo kumeel gaar ah ah, iyadoo si dhamaystiran loogu sameeyay wado bixin iyo dhir jarid. Waxaa gaadiidka loo furay 4.5km wadada kumeel gaarka ah ee baabuurta isticmaali doonaan inta uu socdo dhismaha laamiga. Waxaa sidoo kale geed jaris iyo banaynta dhirta hareeraha wadada laga sameeyay 4km dhinaca Bacaadwayn – Heema.



5. Waxqabadka maamulka, kormeerka iyo dabogalka mashaariicda horumarinta waddooyinka

5.1 kormeerka dhismaha waddada Birta-Dheer - Kalabayr

26kii July, Engineerada tayada iyo Shaybaarka Hay'adda Waddooyinka Puntland (PHA) iyo Engineerada Mashruuca gacanta ku haya ayaa safar shaqo iyo kormeer isugu jira ku tegay dhismaha waddada Birta-dheer Kalabayr, si ay u hubiyaan tayada lakabyada ciida (sub base & base layers), goobta shaqadu ka socoto waxaana laga qaaday (FDT) iyo (DCP) tests, Masaafo dhan 2KM.



5.2 kormeerka PHA dhismaha waddada Gaalkacyo - Bacaadweyn

30kii July, Guddoomiyaha Hay'adda Waddooyinka Puntland Dr. Cabdifitaax Maxamed Sugule ayaa kormeer shaqo ku tagay dhismaha waddada muhiimka ah ee isku xirta Gaalkacyo ilaa Bacaadweyn. Kormeerka ayaa diiradda saaray qeybta ay hadda ka socoto shaqada shirkadda Albaashid, gaar ahaan 3km jid leexad ah oo la diyaariyey.




5.3 kormeerka Dayactirka meelaha burburku soo galay Laamiga Garoowe-Xaaji Khayr

21kii Aghust, Guddoomiye Ku xigeenka Hay'adda Waddooyinka Puntland Mudane Cabdirisaaq Maxamed Xayir oo uu weheliyo Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dayactirka Eng Maxamuud Daahir Siciid ayaa Kormeeray Shaqada Dayactirka meelaha Waddada kasoo yaraatay ee Garoowe-Xaaji Khayr Shaqadaas oo wajiga koowaad Maanta lagusoo gebo gabeeyay deegaanka Xaaji Khayr.



5.4 Kormeerka waddada Gaalkacyo – Bacaadweyn

31di Aghust, Injinneerada Hay’adda Waddooyinka Puntland ayaa booqasho ku tagay mashruuca Galkacyo – Bacadweyn. Waxaa la kormeeray wadada leexadka ah ee la dhisay (9.2km), iyadoo shirkadda lagu wargeliyey meelaha shaqooyin dheeraad ah u baahan, isla markaana ay ballanqaadeen in ay ka hawlgalaan. Waxaa kale oo la soo kormeeyay Borrow Pit locations iyo laabka shirkadda, halkaas oo laga qaaday samples loogu gudbinayo tijaabooyinka hubinta tayada.



5.5 Kormeerka PHA ee Deegaanka Faluuja

1dii September, Guddoomiyaha Hay’adda Waddooyinka Puntland, Dr. Cabdi-fitaax Maxamed Sugulle, ayaa kormeer shaqo ku tagay Deegaanka Fuluuja, halkaas oo ay ka socotay shaqo buuxinta iyo dhigista embankment-ka garabka burbursanaa ee laamiga. Shaqadan waxaa fulinayey Qaybta Birta Culus ee Hay’adda Waddooyinka Puntland (PHA).”



5.6 Kormeerka Injinneerada Hay’adda ee dhismaha waddada Gaalkacyo - bacaadweyn

29kii September Injinneerro ka tirsan Hay’adda Waddooyinka Puntland (PHA) ayaa kormeer ku tagay qaybta u dhexeysa Dismada iyo Gaalkacyo, halkaas oo ay ka socdaan shaqooyinka dhismaha jidka cusub iyo leexadka. Kormeerka ayaa diiradda lagu saaray hubinta tayada wadada, lakabyada ciidda, iyo habsami u socodka howlaha si loo xaqiijiyo in shaqadu u socoto sidii loogu talagalay.



6. Waxqabadka xoojinta xiriirada kala duwan ee Hay'adda PHA

Xoojinta xiriirka Hay'adda Waddooyinka Puntland ee ay la leedahay hay'adaha caalamiga ah iyo deeq bixiyaasha, Dowladda iyo dadweynaha wuxuu ka mid yahay ujeeddooyinka aasaaska u ah gaarista himilooyinka Hay'adda ee horumarinta kaabayaasha dhaqaalaha ee Puntland.

6.1 Xiriirka Hay'adda ee Dowladda Puntland

Hay'adda waddooyinka DPL, waxay xoojisay xiriirka kala dhaxeeya hay'addaha kala duwan ee dawladda Puntland oo ay ka dhaxeeyso wada shaqaynta ku aaddan horumarinta kaabayaasha dhaqaalaha ee Puntland, iyagoo si fiican warbixinadda iyo xogaha u kala qaata.

6.1.1 Fadhiga Ansixinta Yoolasha iyo Waxqabadka Tiirka Horumarinta Dhaqaalaha ee PDP⁴ 2026-2030

22kii September, waxaa la qabtay fadhiga ansixinta yoolasha iyo waxqabadka istaraatiijiga ah ee Tiirka Horumarinta Dhaqaalaha, qayb ka ah geeddi-socodka diyaarinta Qorshaha 4-aad ee Horumarinta Puntland (PDP⁴ 2026-2030).

Kulanka oo Guddoomiye Ku-xigeenka Hay'adda Waddooyinka Puntland, Mudane Abdirizak Mohamed Hayir ku metelayay hay'adda waxaa lagu gorfeeyay xaaladda dhaqan-dhaqaale ee bulshada Puntland.



6.1.2 Munaasabadda xarig Jarka Dowladda ee xarunta xakamaynta xamuulka gaadiidka ee Boosaaso

31dii Aghust, waxaa xarigga looga jaray Xarunta Xakamaynta Xamuulka Gaadiidka ee DPL - Bosaso, taas oo ah goob muhiim ah oo lagu hubinayo culayska gaadiidka si loo ilaaliyo tayada iyo cimriga wadooyinka. Munaasabadda waxaa ka soo qayb galay Wasiirka Hawlaha Guud, Guddoomiyaha Hay'adda PHA, Guddoomiyaha Gobolka Bari, Duqa Bosaso, Gudoomiye kuxigeenka Rugta ganacsiga, Ganacsade Jaamac Dhagadheere, Xildhibaan & Taliyaha Qaybta gobolka Bari.



6.1.3 Kormeerka madaxda labada gole ee Dowladda ee waddada Gaalkacyo - Bacaadweyn

30kii July, Guddoomiyaha Hay'adda Waddooyinka Puntland, xildhibaano katirsan Baarlamaanka iyo Wasiir Dawlaha Madaxtooyada Puntland ayaa kormeer ku tagay dhismaha waddada muhiimka ah ee u dhaxaysa Gaalkacyo iyo Bacaadweyn oo si rasmi ah loo bilaabay qaybtii dhismaha ee ay fulinayso Shirkadda Kebarco, taas oo qeyb ka ah mashruuca laamiga dheer ee 40km ah.



6.1.4 Xarig Jarka dhismaha Dalcadda Kalaale

31dii Aghust, Waxaa si rasmi ah xarigga looga jaray Dalacadda Kalaale oo Sannadkan la dhisay, xarig-jarika waxaa ka soo qayb galay Wasiirka Hawlaha Guud, Guddoomiyaha Hay'adda PHA, Guddoomiyaha degmada Iskushuban. Dalacada kalaale ayaa ah marin muhiim ah oo isku xira Gobollada Bari iyo Raascasayr, waxaa la fuliyay Dhismaha Dalacada Kalaale ee deegaanka Gargoore Degmada Iskushuban ee Gobolka Bari Waxaana iska kaashaday Fulinta Mashruuca WFP iyo Hay'adda Waddooyinka Dowladda Puntland.



6.1.5 Kormeerka laamaha Dowladda ee laamiga Birta-dheer - Kalabayr

6dii September, Wasiirka Maaliyadda Puntland, Mudane Maxamed Faarax Maxamuud, oo ay wehelinayeen Wasiirka Wasaaradda Howlaha Guud, xubno ka tirsan Golaha Wakiillada Dowladda Puntland, Guddoomiyaha iyo Guddoomiye Ku-xigeenka Hay'adda Waddooyinka Puntland, Ganacsade Jaamac Dhagadheere (xubin ka tirsan Guddiga Sare ee PHA) iyo mas'uuliyiin kale ayaa kormeer shaqo ku tegay dhismaha waddada Birta-dheer - Kalabayr.



6.1.6 Kormeerka Laamaha Dowladda ee dhismaha waddada Gaalkacyo-Bacaadweyn

7dii September, Wafdi ballaaran oo uu hoggaaminayey Wasiirka Maaliyadda Puntland, Mudane Maxamed Faarax Maxamuud, ayna ka mid ahaayeen Wasiirka Wasaaradda Howlaha Guud iyo Guddoomiyaha Hay'adda Waddooyinka Puntland, ayaa kormeer shaqo ku tagay dhismaha waddada Gaalkacyo - Bacaadweyn (Qaybta Bacaadweyn).



6.2 Xiriirka Hay'adda PHA iyo Hay'adaha Caalamiga ah

Hay'adda Waddooyinka Puntland waxaa muhiim u ah xoojinta xiriirka Hay'adaha caalamiga iyo deeqbixiyaasha Caalamka ee ay wada shaqayntu kala dhaxayso, si ujeeddadaas loo hirgeliyana

waxaa ay Hay'addu kulamo lagu xoojinayo xiriirka Hay'adaha Caalamiga ah si joogto ah kula qaadataa xafiiska Hay'adda, sidoo Kalena waxa ay qayb ka ahayd kulammo Hay'adaha caalamiga ah si guud ula yeeshaan hay'adaha kala duwan ee Dowladda Puntland.

5.3 Xiriirka Hay'adda ee Dadweynaha

Hay'adda Waddooyinka Puntland PHA waxa ay mudnaan siisay xiriirka la leedahay dadweynaha Puntland, waxaana ay Hay'addu si joogto ah warbixinnada shaqooyinka ay dadka u hayso ay u la wadaagtaa bulshada iyada oo u marinaysa Website ka Hay'adda <https://pha.pl.so> iyo bogga ay ku leedahay Facebook ee Hay'adda Waddooyinka Puntland.

Hay'addu Waxa ay sidoo kale ka qayb noqotaa madallada looga hadlayo horumarinta kaabayaasha dhaqaalaha gaar ahaan waddooyinka si ay u gaarto aragtida bulshada taas oo fududeysay helidda baahiyaha degdegga ah ee bulshadu qabaan isla markaas Hay'addu ku howlgasho ka jawaabistooda.

.